



(Muuminiinta waxaa ugu iimaan sareeya kan ugu akhlaaqda wanaagsan, waxaana idiinku khayr badan kuwa dumarkooda u khayroon.)

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: (Muuminiinta waxaa ugu iimaan sareeya kan ugu akhlaaqda wanaagsan, waxaana idiinku khayr badan kuwa dumarkooda u khayroon.)

[Xadiis Xasan ah] [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At-Tirmidi, Iyo Axmed]

Nabigu scw wuxuu sheegay in qofka dadka ugu iimaan badan uu yahay kan akhlaaqdiisu fiican tahay, taasoo ah waji furnaanta, wanaag samaynta, hadal wanaaga, iyo dhibka oo uu iska daayo. Muuminiinta waxaa ugu khayr badan kuwa dumarkooda u khayr roon, sida xaaskiisa, gabdhihiisa, walaalihiis iyo dumarka qaraabadiisa ah, waayo kuwaasaa u xaq leh akhlaaq wanaagiisa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5792>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

